DEVELOPMENTAL DISABILITIES ADMNISTRATION (DDA)

Qorshaha Bilowga ah ee Baxnaaninta Gaarka ah

Initial Specialized Habilitation Plan

MAGACA MACMIILKA	MAGACA MAAMULAKA KIISKA

MAGACA ADEEG-BIXIYAHA	MAGACA HAY'ADDA ADEEG-BIXIYAHA	TAARIIKHDA QORSHAHA LA QORAY AMA DIB-LOO-EEGAY

Muuji qaybaha la beegsaday ee Baxnaaninta Gaarka ah:

- ☐ Is-Awoodsiin – Taageero lagu kordhinayo isla-hanwaynaanta, isku-kalsoonaanta, iyo xirfadaha lagu gaarayo yoolalka horumarinta shakhsiyeed
- ☐ Wacyiga Bedqabka iyo Isu-Qareemaynta – Taageero lagu kordhinayo wacyiga bedqabka oo si taabogal ah qofku ugu muujinayo baahiyada, rabitaanka, iyo yoolalka
- ☐ Taabogalnimada Shakhsiyaadka Dhexdooda ah iyo War-isgaarsiinta Bulshada ee Taabogalka ah – Taageero lagu horumarinayo xirfadaha bulshada oo lagu joogteynayo xiriirrada ama lagu kordhinayo ka mid ahaanshaha bulshada iyo guriga
- ☐ Istiraatiijiyadaha La-qabsashada ee ku saabsan Caqabadaha Nolol Maalmeedka – Taageero lagu sii wanaajinayo xirfadaha dhibaato xallinta iyo farsamooyinka maareynta walbahaarka
- ☐ Maareynta Hawlaha Maalinlaha ah iyo Barashada Xirfadaha La-qabsiga – Taageero lagu horumarinayo xirfadaha si guul leh lagu dhex degayo bulshada oo lagu kordhinayo madax-bannaanida

Yoolka(yoolalka) iyo ujeeddada(ujeeddooyinka) SMART

U sharax yoolka(yoolalka) iyo ujeeddada(ujeeddooyinka) ee wax looga qabanayo sida ay ugu muuqdaan Siyaasadda 4.20. Qorshe kasta waa in uu leeyahay wax aan ka badneyn saddex yoolal.

Yoolalka iyo ujeeddooyinka SMART waa:

- **Gaar ah**
- **La cabbiri karo**
- **La gaari karo**
- **Habboon**
- **Waqti-ku-xiran**

Yoolka 1	
Yoolka 2	
Yoolka 3	

Immisa jeer ayaa adeegga la bixiyaa

Inta jeer ee la filayo iyo muddada adeegga (inta jeer, iyo inta ay dhan tahay muddada adeegga la filayo in uu socdo si macmiilka uu u gaaro yoolkiisa):

Yoolka 1	
Yoolka 2	
Yoolka 3	

Waa maxay qorshaha? Waa maxay hababka iyo xeeladaha la adeegsan doonno si macmiilka loo taageero? Sidee loo cabbiri doonnaa horumarka oo sidee bay cabbiraaduhu u go'aamin doonnaan soo gebogabeynta adeegga?

Yoolka 1	
Yoolka 2	
Yoolka 3	

Tax soo-jeedimada gudbinta haddii macmiilka uu leeyahay baahiyo caafimaad, caafimaadka dhimirka, ama taageero waxbarasho kale oo suuragal ah (gudbinta waxay noqon kartaa Isuduwe Daryeel, xirfadle daaweyn, ama DDA):

Taariikhda gudbinta:

Saxiixyada

SIXIIXA MACMIILKA	TAARIIKHDA	SAXIIXA WAKIILKA SHARCIGA AH	TAARIIKHDA
SAXIIXA ADEEG-BIXIYAHA	TAARIIKHDA		

Tilmaamaha loogu talagalay Qorshaha Hore ee Baxnaaninta Gaarka ah

Magaca Macmiilka: Kuddar magaca macmiilka.

Maareeyaha Kiiska: Kuddar magaca maareeyahaaga kheyraadka kiiska hadda.

Magaca Bixiyaha: Kuddar magaca adeeg-bixiyahaaga Ka-qaybgalka Bulshada.

Magaca Hay'adda Adeeg-bixiyaha: Haddii aad tahay adeeg-bixiyaha hay'ad qandaraas lala galay, fadlan halkan ku sheeg hay'adaada.

Taariikhda qorshaha la qorey ama dib-loo-eegay: Kuddar goorta qorshahan la dhammeeyay.

Muuji qaybaha la beegsaday ee Baxnaaninta Gaarka ah: Sanduuqa u calaamadee si waafaqsan qaybta Baxnaaninta Gaarka ah ee uu macmiilku jeclaan lahaa in uu la shaqeeyo. Ha calaamadeyn sanduuqyo ka badan yoolalka. Tusaale: Haddii macmiilku uu saddex (3) yoolal leeyahay (oo ah tan ugu badan waqti kasta), waa in ay jirto keliya saddex (3) sanduuqyo ama in ka yar oo calaamadeysan. Waxaa jiri kara yoolal badan oo ku habboon hal qayb, sidaa daraadeed waa suuragal in la helo saddex (3) yoolal, laakiinse keliya laba (2) sanduuqyo ay ka calaameysan yihiin goobtan.

U sharax yoolka(yoolalka) iyo ujeeddada(ujeeddooyinka) ee wax looga qabanayo sida ay ugu muuqdaan Siyaasadda 4.20. Qorshe kasta waa in uu leeyahay wax aan ka badneyn saddex yoolal. Aqoonso yoolalka macmiilka uu leeyahay, shuruudaha yoolka S.M.A.R.T, adiga oo hage ahaan u adeegsanaya shaxda yar ee ku taalla dhanka midig ee foomka. Macmiilka muxuu doonayaa? Waa maxay yoolkooda? Tani waxaa loo baahan yahay in ay tahay mid qofka xuddun u ah, iyo ereyada macmiilka.

Waa maxay inta jeer ee la filayo iyo muddada adeegga? Sharrax inta la filayo in uu socdo adeegga Baxnaaninta Gaarka ah ilaa macmiilka uu ka awoodo in uu yoolkiisa gaaro. Intee jeer ayuu macmiilka u baahan yahay in uu la shaqeeyo adeeg-bixiyaha si uu u gaaro yoolkiisa? Tusaale: Hal jeer toddobaadkii laba (2) saacadood, saddexda (3) bilood ee soo socda.

Waa maxay qorshaha? Waa maxay hababka iyo xeeladaha la adeegsan doonno si loo taageero macmiilka oo sidee buu macmiilka ku oggaan karaa in uu yoolkiisa gaarey? Halkan ku sharrax.

Tax soo-jeedimada gudbinta haddii macmiilka uu leeyahay baahiyo caafimaad, caafimaadka dhimirka, ama taageero waxbarasho kale oo suuragal ah (gudbinta waxay noqon kartaa lsuduwe Daryeel, xirfadle daaweyn, ama DDA): Qaybtan ku qor gudbinno kasta ee lagama maarmaan u ah macmiilka ee ka baxsan waxa ay Baxnaaninta Gaarka ah bixin karto. Tusaalooyinka tixgelinta: Ma jiraan wax walaacyo ah oo laga qabo caafimaadka dhimirka ama baahiyada waxbarasho ee macmiilka ee loogu talagalay carruurta jirta da'da iskuulka? Macmiilka ma u baahan yahay in loo gudbiyo kheyraadka aanan weli lagu xiriirrin?

Sixiixa Macmiilka: Macmiilka waa in uu halkan saxiixo.

Sixiixa Wakiilka Sharciga: Marka ay ku habboon tahay, wakiilka sharciga ah ee macmiilka ayaa u baahan in uu halkan saxiixo, taas oo uu ku oggolaanayo qorshahan hore.

Saxiixa Adeeg-Bixiyaha: Adeeg-bixiyaha Baxnaaninta Gaarka ah ayaa halkan saxiixi doonna.